Toronto District School Board

Abriil 14, 2020

Waalidiinta iyo Mas'uuliyiinta Qaalliga ahoow,

Maadaama aan sii galayno asbuuca labaad ee waxbarashada oonleenka ah ee Gudigga Degmo Dugsiyeedka Toronto, waxaan idiin ka mahad celinayaa wada shaqayntiina iyo dulqaadkiina anagoo ka caawinayna ardayda iyo macalimiinta kasoo guurida waxbarashada tooska ah iyo u guurida waxbarashada oonleenka ah.

Qaar badan oo idin ka mid ah ayaa maqlay in Premier Doug Ford maanta ku dhawaaqday inaan ardaydu aysan ku laaban doonin dugsiga bisha Maayo 4 sidii horay loo sheegay. Wuxuu sheegay inaan arintaani ka dhignayn in sanad dugsiyeedka la joojiyay iyo wasaarada waxbarashada ay faahfaahin dheeraad ah bixin doonto maalmaha soo socda. Isla marka aan ogaano xog cusub aana helno faahfaahin aan idin la wadaagno, waan idiin soo sheegi doonaa.

Waan ognahay in qoysasku ay su'aalo badan qabaan ayna waajahayaan tiro caqabado ah waqti xaadirkaan shaqaalaheena ayaana doonaaya inay taageero idin siiyaan ilaa inta suurtagalka ah. Sidaas awgeed, macalimiinta ayaa kula xariiraaya qoysaska qaabab kala duwan, sida aalada soft-weerka ah sida Google Classroom ama Brightspace, ama dhanka iimeelka, taleefanka ama boostada tooska ah.

Maadaama aan nidaamkaan kawada shaqaynay dhawrkii asbuuc ee lasoo dhaafay, waxaan falcelin fiican ka helnay ardayda, qoysaska iyo shaqaalaha. Tallooyinka lasoo jeedshay iyo walaacyada la muujiyay ayaa aad u kala duwan. Si ay nooga caawiyaan jawaab celinteena, waxaan leenahay shan mabda' oo hagaaya shaqadeena intaan horay usii socono.

1. Muhiimad siinta caafimaadka iyo faya qabka qof kasta.
2. Diirad saarida sii wadista waxbarashada ayadoo la adeegsanaayo qaabab kaladuwan.
3. Inaan joogtayno xariiradeena iyo isku xirnaanteena.
4. Inaan la falgalno dhammaan ardayda, gaar ahaana kuwa taariikh ahaan aan heli jirin adeegyo ku filan iyo kuwa laga yaabo inaysan awoodin ka qaybgalka si waxtar leh waxbarashada oonleenka ah sababo kala duwan awgood.
5. Inaan dhisno awooda shaqaalaha si ay u noqoto mid wxtar u leh waxbarashadaan oonleenka ah.

Fadlan ogsoonoow inaan muhiimada siinayno siinta arday kasta fursad uu kusii wato waxbarashada si oonleen ah oo badbaado leh asagoo guriga jooga. Waxaan sido kale taageeraynaa shaqaalaheena daryeelka leh si ay ugu adeegaan carruurtiina qaabka ugu wanaagsan ee suurtagalka u ah hanaankaan waxbarashada oonleenka ah. Sida caadada noo ahaydba, waxaan sii wadayaan inaan hadba xogtii u danbaysay inii soo gudbino inaan hawsha wadno. Hoos waxaad ka helaysaan xog ku saabsan:

- Badqabka Oonleenka ee Ardayda
- Qaybinta Aaladaha
- Aaladaha Waxbarashada Oonleenka ah
- Qiimaynta Ardayga

- Safarada Dalxiiska, Qalin jabinta iyo Munaasabadaha kale
- Shaqaalaha lala xariiraayo ujeedo: Su'aalaha iyo Mawduucyada
- Ilaha Caafimaadka Dhimirka

## Badqabka Oonleenka ee Ardayda

Inta lagu jiro waqtigaan ay arday badan galinayaan baraha oonleenka ah, si wayn ayay muhiim u u tahay in la dhaqan galiyo farsamooyinka dhawrista badqabka oonleenka. Interneetka ayaa fursado badan siinaaya bulshooyinkeena si ay wax u bartaan ayna u wada xariiraan, laakiin waxa uu sidoo kale ilmaha yar khatar u galinayaa dhibaataynta dhanka interneetka, adeegsiga khaldan ee baraha bulshada, arimo dhanka sirtooda ah iyo waxyaabo kale. Hoos waxaad ka helaysaa xog kaacaawinaysa taageerida wada sheekaysiga ku saabsan badqabka oonleenka ah oo aad la yeeelato qoyskaaga. haddii aan wada shaqayno - waalidiinta/masuuliyiinta, ardayda iyo macalimiinta - waxaan gacan ka gaysan karnaa ka caawinta ardaydeena inay ka badbaadaan khataraha oonleenka ah.

Halkaan waxaad ka helaysaa tilmaamaha muhiimka u ah badbaadada oonleenka ah ee waalidiinta/masuuliyiinta iyo ardayda:

- Ardaydu waa inaysan marna cid kale kula wadaagin xogtooda shaqsiga ah, sida nambarka taleefankooda, ciwaanka, nambarka caymiska bulshada, taariikhda Dhalashada, sawiradooda shaqsiga ah ama xogta dhaqaalaha, khadka interneetka ayadoon qof wayn u fasixin;
- Haddii ardaydu arkaan fariin, fikir la dhiibtay, sawir, ama wax kale oo oonleen ah kaasoo walaac ku abuuro badbaadooda shaqsiga ah ama dareen xun ku dhaliya, waa inay si dhakhso ah qof wayn ugu sheegan; iyo
- Waalidiinta/masuuliyiintu waa inay ka warqabaan lana socdaan webseetyada, gaymamka muuqaalka ah iyo aaladaha cunugaagu adeegsanaayo si aad u hubiso inay yihiin kuwo ilmaha ku habboon uuna u adeegsanaayo qaab amaan ah.

Wixii xog dheeraad ah, fadlan booqo Bogga webseetka Badqabka Oonleenka ah ee TDSB.

## Aaladaha Waxbarashada Oonleenka ah iyo Shirarka Webseetka

TDSB waxay siisa macalimiinta dookhyo ay ku helayaan aaladaha Waxbarashada Oonleenka ah iyo shirarka muuqaalka ah si ay ardayda ula xariiraan oonleen ahaan. Waa go'aanka macalimiinta nooca aaladaha ay adeegsanayaan iyo qaabka ugu haboon ee ay ula shaqaynayaan ardayda iyo qoysaska, ayagoo raacaaya aqoontooda iyo heerka ay ku qanacsan yihiin iyo sidoo kale ka baaraan dagida xaaladaha ardayga iyo qoyska. Waa muhiim in ardayda iyo qoysasku xasuusnaadaan in waxbarashada oonleenka ah ee fasal kasta ay ka duwanaan doonto kuwa kale laguna salayn doono xukunka uu shaqsiyan rido macalinka.

Macalimiinta waxaa lagusoo dhawaynayaa inay adeegsadaan shirarka muuqaalka ah laakiin qasab maaha inay sidaas yeelaan. Yoolkeena koobaad waa in lala shaqeeyo dhammaan ardayda. Arintaan ayaa lagu samayn doonaa qaabab badan oo kala duwan iyo ayadoo la adeegsanaayo xeelado kaladuwan iyo qalab oonleen ah. Waxaan filaynaa in macalimiinta iyo

barayaasha loo xilsaaray waxbarashada dhallaanka ee dugsiga barbaarinta ay heli doonaan qaab ay si joogto ah ula shaqeeyaan ardaydooda si loo hubiyo in ardaydu awoodaan helitaanka shaqooyinka waxbarashada iyo agabka, inay hubiyaan faya qabka ardayda ayna siiyaan ardayda falcelin.

Waxaan aqoonsanahay in qoysaska leh arday qaba baahiyaha waxbarashada Gaarka ah ama ardayda Bartayaasha Luuqada Ingiriisiga ay u baahan karaan feejignaan gaar ah si loo taageero baahiyaha gaarka ah ee waxbarashada. Taageerida dhammaan ardaydeena kala duwan ee dhigata TDSB ayaa muhiimada la siinayaa halka macalimiinta iyo shaqaalaha ESL/ELL ay sii wadi doonaan kala shaqaynta shaqaalaha kale ee dugsiga sidii si mid gaar ah looga dhigo barnaamijka ardayda ayadoo la raacaayo awoodo iyo baahiyo gaar u ah ardayda oo ku cad IEP g ardayda qaba baahiyaha waxbarashada Gaarka ah kuwaasoo helaaya Manhajka Ontario ama Manhajka Gaarka ah ama ah Bartayaasha Luuqada Ingiriisiga. Qoysaska waxaa lagu boorinayaa inay booqdaan bogga Ilaha Waxbarashada Gaarka ah ama Ilaha ESL si ay u helaan ilo iyo agab kaalmaati ah oo ka taageeraaya waxbarashada oonleenka ah.

## U qaybinta Aalada Ardayda

Si loo taageero ardayda u baahan aalada si ay u helaan waxbarashada oonleenka ah, waxaan dajinay qorshayaal aan ardayda kusiinayno aalado ay muddo cayiman haysanayaan. Sidaad qiyaasaysaba, waxaa nasoo gaaray codsiyo aad u badan — ku dhawaad 29,000 oo qoyska ayaa codsanaaya aalado — laakiin shaqaalaha ayaa ka shaqaynaaya maalin iyo habeen sidii ay u diyaarin lahaayeen una qaybin lahaayeen aaladahaan sida ugu dhakhsaha badan. Waxaan go'aaminay in aan aalada toos u gayno guryaha ardaydeena si loo hubiyo in qoysaskoodu badqab ku joogaan guriga. Dookhaan ayaa qaadan doona waqti dheeraad ah, laakiin badqabka bulshooyinkeena ayaa leh muhiimada koobaad.
Haddii cunugaagu helo aalad, waxaan ka taageeri doonaa qoysaska ciladaha dhanka farsamada. Waxaan xogtaan soo raacinaynaa keenista aalada. Ardayda ayaa sidoo kale la xariiri kara macalimiintooda si ay usoo sheegaan dhibaatooyinka ka haysta aalada.

Waxaan sidoo kale doonaynaa inaan xaqiijino in ardayda qaba baahiyaha waxbarashada gaarka ah ay helaan qalabka Cadadka Waxbarashada Gaarka ah (SEA) si looga taageero waxbarashada oonleenka ah. Qoysaska iyo dugsiyadu waxay la shaqayn doonaa kooxda Waxbarashada Gaarka ah ee SEA, kooxda OT/PT iyo kooxda IT ga si loo xaqiijiyo in midkood aaladaha Chromebooks ka ama qalab gaar ah oo taqasus gaar ah leh loo geeyo ardayda.

## Qiimaynta Ardayga

Waan ogahay in xogtaan horay laguula wadaagay, laakiin waa muhiim in adigga iyo cunugaagu aad fahantaan hanaanka qiimaynta ee waxbarashada oonleenka ah:

**Ardayda ku jira dugsiga hoose**, macalimiinta ayaa adeegsan doona qaabab ay ku aruurinayaan cadaynta waxbarashada ardayga waxayna jawaab macno leh siinayaan ardayda ayagoo u sheegaaya hormarka ay sameeyeen. Cadaynta kobaca muuqda ee laga sameeyo waxbarashada, inta lagu jiro muddada dugsiyadu xiran yihiin, ayuu macalinku ka baaran dagi karaa marka uu ardayga siinaayo buuldada kama danbaysta ah ee maado gaar ah. Haddii kale,

Toronto District School Board

ardayda ku jira Fasalada 1 ilaa 8 waxaa la siin doonaa buundooyinka ay helaan ayadoo laga fiirinaayo waxbarashadooda ilaa markii dugsiga la xiray Maarso 13, 2020. Dhammaan ardayda, Fasalka barbaarinta ilaa Fasalka 8, way heli doonaan kaarka warbixinta ee Juun.

Buundooyinka bartamaha fatrada waxaa kaliya loo qoryaa **ardayda Fasalka 12** marka la gaaro Abriil 27 si ay u buuxshaan waqtiga u cayiman in buundooyinka loo gudbiyo Xarunta Codsiga ee Jaamacadaha Ontario (OUAC) iyo Adeegga Codsiga Kuleejka Ontario (OCAS). Buundooyinka ayaa muujinaaya shaqada la qabtay ilaa laga gaaraayay Maarso 13, 2020 (lagasoo billaabo biloowga simistarka ee dugsiyada simistarka ku shaqeeya, ama kaarkii ugu danbeeyay ee warbixinta gobalka ee dugsiyada aan lahayn simistarka). Hase yeeshee, macalimiinta ayaa aqbali kara layliyada la rabay in lasoo gudbiyo kahor Maarso 13 waxayna ardayda u dhiibi karaan layliyo dheeri ah Abriil 6 si ay fursad u siiyaan ardayda si ay u muujiyaan waxbarashadooda. Layliyadaan waxaa lagu darayaa buundada bartamaha fatrada kaliya haddii ay kor u qaadayaan buundada ardayda ee Maarso 13.

Ardayda ku jira dugsiga sare, macalimiinta ayaa u dhiibaaya shaqooyin, mashaariic iyo nashaadaad isku dhaf ah inta lagu jiro waxbarashada oonleenka ah kadibna jawaab ka siinaaya buundada ay keeneen; hase yeeshee, shaqadaan waxaa kaliya lagu darayaa buundooyinka kama danbaysta ah haddii ay kor u qaadayaan buundada ardayga. Haddii aysan kor u qaadayn, buundooyinka lasoo gudbiyo Juun waxay muujin doonaan shaqadii la qabtay wixii ka horeeyay Maarso 13, 2020.

Waxaan fahmaynaa in qoysasku ay walaac ka qabi karaan daldaloolada ka jira waxbarashada oonleenka ah ee imaan kara inta waxbarshada oonleenku socoto. Marka mudada dugsigu xiran yihiin dhamaato aana gaarno dayrta soo socota, waxaan si wayn ugu dhug lahaan doonaa inaan fahano baahiyaha waxbarashada ee arday kasta waxaana siin doonaa caawimaad ku haboon marka loo baahdo.

Dhammaan ardaydu waa inay awoodaan helitaanka waxbarasho oonleen ah ama ayadoo la adeegsanaayo ilaha daabacaada. Ardayda qaar waxaa laga yaabaa inaysan ku jacsanayn sii wadista waxbarashada si oonleen ah marka laga eego qaabka aan u tirinayno buundooyinka dhawrka bilood ee soo socda, laakiin waxaan ka codsanaynaa ardayda inay door ku lahaadaan waxbarashadooda mar kasta oo ay awoodaan. Arintaan ayaa ka caawinaysa ardayda markaan awood u yeelano ku laabashada dugsiyada si caadi ah iyo fasalada. Xataa haddii ardaygu dareemaayo inuusan awoodin ka qaybgalka sii wadista waxbarashada oonleenka asagoo guriga jooga, waxaan ka codsanaynaa inay ku xirnaadaan dugsigooda ayna la xariiraan macalinkooda.

## Safarada Dalxiiska, Xafladaha Qalin jabinta iyo Munaasabadaha kale

Waxaa nasoo gaaray su'aalo badan oo la xariira safarada dalxiiska, xafladaha qalin jabinta, tartanada iyo tiro nashadaadyo kale ah. Ayadoo ay jirto hubaanti la'aanta ka jirta waxa dhici doonaa asbuucyada soo socda, waxaan gaarnay go'aan xanuun badan oo ah inaan baajino dhammaan safarada dalxiiska iyo socdaalada habaynkii lagu dhaxo inta ka hartay sanad dugsiyeedka. Marka laga hadlo dhammaan nashaadaadka kale, sida xafladaha qalin jabinta iyo tartanada, waxaan ka shaqaynaynaa inaan xaqiijino xogtaantaan mar dhaw.

## Ilaha iyo Caafimaadka Dhimirka

Waan fahmayna in waqtigaan uu dhib badan ku hayo qoysas badan iyo in karantiilku saamayn karo caafimaadka dhimirka iyo faya qabka. Haddii loo baahdo, fadlan hel xogta muhiimka ah ee ku saabsan caawimaada shaqsiga ah iyo adeeg bixiyaasha oo aad ka helayso bogga webkeena Caafimaadka Dhimirka iyo Faya qabka. Waa muhiim inaan ka wada shaqayno ka caawinta bulshooyinkeena inay helaan badbaado, jirahaan iyo maskax ahaanba.

## Waxaan Taageeri Doonaa Qoysaskeena

Waxaan doonayaa inaan xoojiyo abaalka aan idiin ka hayo wada shaqayntiina iyo dulqaadkiina. Waad ku mahadsan tihiin taageeradiina joogtada ah iyo dadaalka aad galiseen waxbarashada ilmihiina iyo waxbarashada dhammaan ardayda ku sugan Degmo Dugsiyeedka Toronto. Waxaan ognahay inay jiri doonaan riixitaano iyo balaarino lagu samaynaayo intaan hawsho wadno, laakiin waan ka guulaysan doonaa caqabadahaan si wadajir ah. Waxa hadda ugu muhiimsan waa in adigga iyo qoyskaagu helaysaan badbaado inta lagu jiro waqtigaan adag.

Haddii aad qabto wax su'aalo ah, fadlan iimeel u dir macalinka cunugaaga si toos ah. Haddii aad caawimaad dheeraad ah u baahato, fadlan la xariir maamulaha dugsiga. Haddii aad qabto su'aal la xariirta dugsiga, laakiin aadan haysan iimeel, fadlan taleefanka ka wac dugsigaaga, fariin u reeb kadibna qof ayaa kugusoo celinaaya wicitaanka sida ugu dhakhsiyaha badan ee suurtagalka ah. Haddii aad qabto su'aal la xariirta nidaamka, fadlan iimeel udir maamulaha guud. Haddii aadan haysan iimeel, fadlan taleefanka ka wac Xafiiska Muulahaaaga Guud, fariin u reeb kadibna qof ayaa kugusoo celinaaya wicitaanka sida ugu dhakhsiyaha badan ee suurtagalka ah. Si aad u hesho xogta aad kala xariirayso dugsigaaga, fadlan booqo webseetka Find Your School (Hel Dugsigaaga). Sidii caadada ahaydba, si aad u hesho xogtii ugu danbaysay, fadlan booqo webseetka TDSB.

Mar kale, fadlan sii wada inaad naftiina iyo qoyskiinaba daryeeshaan.

Daacad kuu ah,



John Malloy
Director of Education